


Kitaabka Quduuska ah ee
loogu talo galay Carruurta
Soo-jeedinayaa

Ishacyaah Baa Arkay
Mustaqbalka



Waxa qoray: Edward Hughes

Waxa Tusaaleeyay: Jonathan Hay

Waxa dhaqan-geliyay: Mary-Anne S.

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia


Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.

Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyaaso ama daabacato
qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Ishacyaah nebi buu ahaa. Shaqadiisana waxay ahayd inuu dadka u sheego waxa Ilaah ku soo yidhaahdo.




Dadkase marwalba ma aysan jecleeyn inay maqlaan Ereyga Ilaah, laakiinn Ishacyaah weligii Ilaah ma quudhsan. Ishacyaah wuxuu dadka wacdin jiray


wakhtigii ay wadanka kala xukumayeen afarta boqrtooyo oo kala duwan.




Boqor Cusiyaah ayaa xukumay dhulkii Yuhuudda
inta ka soo rogan Yerusaalem. Markii hore,
Ilaah wuu barakeeyey Cusiyaah sababtoo ah
wuxuu sameeyey wax ku quman Rabbig hortiisa.
Laakiin Cusiyaah wuu kibray oo wuxuu joojiyey
inuu addeeco Ilaah. Wuxuuna noqday nin baras
leh oo kelinimo ku noolaa ilaa u ka dhinto.




Boqor Cusiyaah wuxuu wadanka xumumayay in ka badan 60 sanadood. Markii uu dhintay, wiilkiisii Yootaan ayaa meeshiisii galay oo xukunkii sii hayay ilaa iyo toddoba iyo toban sanadood. Ilaah wuu baraakdeeyey Yootam sabatoo ah wuxuu dhageystay waxa uu Ilaah u soo sheego Ishacyaah iyo nebiyadii kale.



Boqor Yootam wiilkiisa wuxuu ahaa
Axaas. Axaas labaatan jir buu ahaa
markii uu xukunka la wareegay,
wuxuuna Yerusaalem
xukumayaya lix iyo
toban sanadood.



Axaas Ilaah dan kama lahayn. Wuxuuna caabvudi
jiray sanamyo iyo ilaahyo been abuur ah, oo in
badan buu u horseeday dadkii Ilaah inay sameeyaan
sidiisii oo kale. Inkastoo
Ishacyaah uga digay, Axaas
ma uusan maqlin digniinta
Ilaah. Wuxuuna dhintay
isaga da'diisu
tahay 35
Jir keliya.



Ilaah wuu barakadeeyey boqorkii
xigay, Xisqiyaah, sababta oo ah
wuxuu meesha ka saaray sanamyadii
iyo ilaahyadii beenbeenta ahaa,
oo wuxuu baryay Ilaah runta ah.
Markii ciidankii cadowga soo
weeraray Yuhuudda, Xisqiyaal wuu
ogaa ciidankiisa inay aad daciif u
yihiin in laga adkaado. Wuxuu
Ishacyaah weyddiistay inuu ka
baryo caawimaad Ilaahay.




Ishacyaah farriin buu u diray boqorkii. "Ha ka cabsan cadowgan ... Aniga ayaa ridi doonno ... " Inyar ka dib, Ilaah wuxuu sameeyey ciidankii cadowga inay iska tagaan iyagoon xitaa la dagaalamin Xisqiyaah.




Inkast oo
dadka ku
hareereysnaa
isaga aysan
aad uga
fikireyn

waxyaabaha Ilaah
ku saabsan,
Ishacyaahse aad
buu uga fikiri
jiray waxyaabaha
ku saabsan Ilaah
inbadan.




Maalin baa,
wuxuu helay
manaam, oo
la mid ah
noocyada u
ek sida riyo
la riyoodo

adoo soo jeeda.
Aragtidaa waxay
ahayd, Ishacyaah
oo arkay ammaan
iyo qudduusnimada
Rabbiga uu
leeyahay.



"Yaan diri doonaa?" Ilaah
baa ku dhex weyddiiyey
manaamkii. "Waa ikan.
Aniga i dir," Ishacyah
baa sidaa ku jawaabay.
ISagu doonistiisu wxay
ahayd inuu sameeyo
waxwalba oo uu Ilaah
weyddiiyo, oo uu aaado
meelwalba oo uu u diro
isaga.



Lagayaabee Ishacyaah inuuku fikirayay Iklaah
in uu u dirayo isaga dad meelo fogfog jooga
oo aan maqlin waxyaabaha ku saabsan Ilaah.
Laakiinse maysan ahayn, Ilaah ma uusan
samayn taas.



Ilaah wuxuu u sheegay Ishacyaah inuu la hadlo
dadka degan dalkiisa. Oo ahayd inuu u sheego
iyaga in Ilaah ka cadhooday dembiyadooda.




Waxaa jiray waxyaalo kale oo ahayd inuu Ishacyaah
dadkiisa u sheego- waxyaalo la yaab leh oo ku
saabsan Qod xoog weyn leh oo ka soo samata bixin
doona in uu u iman doono kan badbaadin doono

dembiyadooda
iyo cadow-
goodaba.




Dadka Yuhuudda ah waxay ugu yeedhaan Qofkaasi
"Masiix" Xitaa inkastoo iyaga ay ka filayeen Ilaah
inu u soo diro Masiix, dad badan baa u noolaa sidii
inuusan weligii imanayn.



Wax walba oo uu kaga hadlay Ishacyaah eek u
saabsanaa Masiix waxy ku qornaayeen buugiisa.


Inasta oo
uu qoray.

Inksasta oo
waxyaalahan kla
qoray boqolaal
sanadood ka
hore intii aysan
dhicin, waxwalba
oo ku saabsan
waxyaalihii uu
ka sheegay
Masiix way
rumoobeen.



Ishacyaah baa wuxuu yidhi
Ilaah qodhiisa ayaa
calaamad idin
siin doono.


OO wuxuu kale oo uu
yidhi, "Bal eega, bikrad baa
wiil dhali doonto oo waxaa
loogu yeedhi doonaa
Cimmaaanuu'eel."




Dadku waxay ogaayeen
Ishacyaah waxyaalaha
uu ku hadlayo ee
ku saanbsan

Masiixa Ilaah sababtoo ah
naagtu bikrad maysan ahayn
oo ilmo ayay haysatay. Oo
weliba micno micnaha
ereyga Cimmaanuu'eel

waxay la mid tahay
Ilaah baa inala jooga!






“Waayo, waxaa inoo dhashay ilmo, waxaa Layna siiyey wiil, oo boqornimadu garbihiisey saarmi doontaa, oo magaciisa waxaa loo bixin doonaa Ka yaabkaleh, iyo Ilaaha xoogga leh, iyo Aabbaha daa’imka ah, Amiirka Nabadda.”
Ishacyaash aad buu u hubay inay ballanta Ilaahay rumoobi doonto, wuxuuna wax u sheegay sidii iyadoo wixiiba ay dhaceen. Taasina waxaa la yidhaahdaa waxsii sheegidda.



Ishacyaah wuxuu yidhi Masiix wuu weyn yahay oo wax weynna wuu samayn doonaa. Ilaah haddana Idahcyaah wuxuu u sheegay inuu dadka u sheego Masiixaa inuu silci doono oo uu la dhimn doono dhibaataadaa. Lagayaabe inuu IShacyaah la yaabay sidee buu Masiix u ahaan karaa qof weyn oo xoog leh haddan islamarkaas u taag darnaanayaa oo u dhaawacmayaa.



Laakiin IShacyaah lama uusan
murmi karayn Ilaah - waxa ayn
keliya ay ahayd inuu ku soo
celceliyo wixii Ilaah u sheegay
un. Ilaana wuu hubaa waxsii
sheegiddiisa inay run atahay.



Masiix wuu iman doonay - Dadka Yuhuuda keliya ma aysan ahayn, Ilaah wuxuu u sheegay Ishacyaah in Masiix yahay "Iftiinka dadka aan Yuhuudda ahayn". Dadka aan Yuhuudda ahayd ee dunida jooga oo idil inaysan ahayn Yuhuudd. Ilaah wuxuu jecel yahay qof walba oo Masiix iyo Masiixiisa wuxuu u iman doonay inuu barakadeeyo qof walba oo uu badbaadda u keeno xitaa meesha ugu dambaysa dunida ha ahaato hadday doontee.



Ishacyaah Baa Arkay Mustaqbalka

Qiso ka ahaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Ishacyaah 1, 6, 7, 9, 53

"Erayadaada furniinkoodu wax buu
iftiimiyaa." Sabuurka 119:130



Dhammaad



Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Cigaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro cigaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16

